

## Waa maxay Novel Coronavirus (Caabuqa Xalfaafka Wadnaha)?

Caabuqa Xalfaafka Wadnaha (COVID-19) waa fayris jirka ku dhaca oo dadka ku faafay lagasoo bilaabo Diseembar 2019. Khubarada caafimaadka ayaa walaac qaba waayo xog badan lagama hayo fayriskaan cusub wuxuuna keeni karaa xanuun daran iyo hargab ku dhaca dadka qaar.

## Sidee ayuu ku faafaa caabuqa xalfaafka wadnaha?

Khubarada caafimaadku waxay wali baranayaan xogta faahfaahsan ee ku aadan sida caabuqaan cusub ee neef mareenadu ku faafo? Caabuqyada kale xalfaafka waxay kasoo faafaan qof ayagoo dadka kale ugu gudba:

- hawada marka qofku uu ku qufaco iyo markuu hindhiso
- dadka isku soo dhawaada, sida taabashada ama salaanta gacanta la isa saaro
- taabashada shay ama meel fayrisku ku yaalo, kadibna la taabsiyo afkaaga, sinka, ama indhaha
- marar dhif ah, taabashada saxarada

## Ilaa intee ayuu daran yahay Caabuqa Xalfaafka Wadnaha?

Khubaradu waxay wali baranayaan xadiga xanuunka ka dhasha Caabuqa Xalfaafka Wadnaha. Kiisaska lasoo sheegay waxay u dhaxeeyaan xanuun daran (kuwaaso la mid ah hargabka caadiga ah) ilaa hargab daran kaasoo u baahan isbitaal in la dhigo qofka. Illaa iyo hadda, waxaa lasoo sheegay inay xanuunka u dhinteen inta badan dad duqoow ah oo horay u qabay xanuuno kale.

## Waa maxay astaamaha fayrisku?

Dadka laga helay Caabuqa Xalfaafka Wadnaha waxay soo sheegeen astaamo ay ka mid yihiin muddo kooban oo 2 maalmood ah ama muddo dheer oo dhan 14 maalmood kadib marka fayrisku ku dhacay:

Qandho



Qufac



Neefta oo  
ku adkaata

